

# Dugsi hoose dhexe ilaa Dugsi sare: Tallaabada ku xigta ee weyn

Fahamka shaqada dugsiga ee ilmahaaga



Fasalka 7, ardeygaaga waxaa la barayaa maadooyin aan hore u soo marin, iyo maadooyin kale oo siyaalo kale duwan loo wajahayo iyo xoog saarida waxbarashada dugsiga hoose dhexe.

Waxaa sidoo kale laga rajeynayaa inay noqdaan kuwo madax bannaan oo nafsadooda isku haleynaya marka loo eego dugsiga hoose dhexe

Si ay xaq ugu yeeshaan School Certificate (shahaado ay ka heleen si guul leh markay ku dhameystaan koorsada fasalada 7-10) dhammaadka Year 10, ardeyda waa inay bartaan maadooyinka soo socda ee Year 7:

- Ingiriis
- xisaab
- saynis
- juquraafi
- taariikh
- afafka
- tignoolajiyada
- farshaxanka muuqaalka
- muusikada

- horumarinta shakhsiyeed, waxbarashada jirka iyo caafimaadka (PDHPE).

Ardeyda dhigata Years 7-10 waxay sidoo kale awoodi doonaan inay doortaan maadooyinka wax laga dooranayo. Tusaalayaasha maadooyinka badanaa la siiyo Years 9 iyo 10 waa:

- barashada Aboriginalka
- tignoolajiyada beeraha
- ganacsiga
- qoob ka ciyaarka
- naqshada iyo tignoolajiyada
- jillida
- tignoolajiyada cuntada
- tignoolajiyada garaafkada
- tignoolajiyada wershadaha
- tignoolajiyada macluumaadka iyo barnaamij sameynta
- tignoolajiyada mariinada iyo badda

- muusikada
- isgaarsiinta sawirada iyo kamarada
- barashada cayaaraha iyo nashaadka jirka
- tignoolajiyada dharka
- farshaxanka muuqaalka
- naqshadeynta muuqaalka
- waxbarshada shaqada
- ka doorashada 17 af

Maadooyinka laga dooranayo ee lagu bixiyo dugsigaaga sare ee dadweynaha waxay ku xirnaan doonaan tirada ardeyda xiiseynaysa maadooyinka gaarka ah, iyo khibrada laga heli karo isla dugsiga gudihisa. Haddii ilmahaagu leeyahay awood waxqabad gaar ah ama meel uu xiiseynayo, waxaa sidoo kale laga yaabaa inaad jeclaato mid ka mid ah dugsiyadayada sare ee wax khaaska ku ah.

Kuwa kale ee nashaadka dugsiga gudihiisa.

Qaar ka mid ah nashaadka kale ee uu bixiyo dugsigu si uu u taageero ardey kasta horumarkiisa shakhsiyeed iyo bulshadeedba waxaa ka mid ah:

- dhexdhaxaadinta geyaanka iyo taageerada
- taageeraha ardeyga
- barnaamijyada awooda garashada ee dabiiciga ah
- barnaamijyada aqoonsiga iyo abaalmarinta
- waxbarashada caafimaadka iyo daroogada
- waxbarashada midab kala sooca ka soo horjeeda
- waxbarashada ilaalinta ilmaha iyo shaqaaqada qoyska
- barnaamijyada ka hortaga dembiga
- barnaamijyada jir dhiska iyo caafimaadka
- Year 6-7 barnaamijyada ka gudubka marxalad
- tababarada hogaaminta ee ardeyga
- golayaasha metela ardeyga
- dalxiiska gaaban iyo habeen dhaxa sahanka adag leh

Shaqada guriga

Ilmahaagu wuxuu badanaa sidan doonaa shaqo guri maalin kasta oo dugsi jiro iyo isla markay u sii gudbaan fasalada sare shaqada guriga iyo baahida waxbarashaduba way kordheysaa. Shaqada gurigu waxay xoojineysaa shaqada fasalka lagu sameeyo waxayna ka caawineysaa xirfada sida baaritaanka iyo maamulida wakhtiga. Waxay sidoo kale caawineysaa sameynta habkii aad wax u baran laheyd, la socodka waxaad qabaneysa iyo anshaxa nafsiga ah.

Waad caawin kartaa ilmahaaga adoo:

- xiiso firfircoon siinaya shaqadooda guriga
- ku taageeraya sidii ay wakhti dhinac ugu dhigi lahaayeen shaqada guriga maalin kasta
- siinta wakhti loogu talagalay shaqada guriga iyo waxbarashada haddii ay suurto gal tahay
- ka caawinta macalimiinta la socodka shaqada guriga adoo saxiixaya shaqada la dhameystirey haddii sidaas lagaa codsado, iyo ka warqabka inta shaqo guri ah ee laga rabo.
- kala xirririda macalimiinta wixii aad saluugsan tahay ee ku saabsan qaabka shaqada guriga ama sida uu u wajahayo ilmahaagu shaqada guriga
- ku dhiirigelinta ilmahaaga inuu wax akhriyo iyo xiiseynta dhacdooyinka jira

- wargelinta dugsiga wixii xaalad guri ah ama nashaad dheeraad ah oo ka baxsan manhajka ee u baahan in la tixgeliyo marka la dejinayo shaqada guriga ama la saxayo.

Dugsi kastaa wuxuu sameystaa nidaamkooda shaqada guriga iyagoo la tashanaya waalidka iyo xannaaneeyayaasha. Waxaad ka heli kartaa nuqul dugsigaaga.

Warbixinta horumarka

Waxaad ka heli doontaa ugu yaraan laba warbixinood oo qoraal ah oo ku saabsan horumarka ilmahaaga sannad kasta – badanaa dhammaadka xilliga 2 iyo 4. labadaba Maamulaha iyo macalimiintuba aad ay ugu faraxsanaan doonaan inay kaala hadlan horumarka ilmahaaga.

Dugsiyada badidoodu waxay qabtaan kulamada waalidka/macalinka( oo badanaa ah fiidanka) si ay u siiyaan waalidiinta fursado ay kala hadlaan ilmahooda horumarkiisa mid kasta oo ka mid ah macalinka ilmahooda. Dugsiyada sare badidoodu waxay kula taliyaan waalidiinta inay soo booqdaan ama taleefan u soo diraan dugsiga wakhti kasta haddii ay doonayaan inay kala hadlaan arin ay saluugsan yihiin ama fikrado ay ka qabaan horumarka ilmahooda.

Haddii loo baahan yahay, waxaad codsan kartaa turjubaan inuu joogo kulamada macalinka/waalidka meeshii suurto gal ahna waxaa ballaminaya dugsiga.

## Adeega turjubaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay turjubaan kaa caawiya si aad ula xirriirto maamulahaaga, fadlan wac Adeega Turjubaanka Taleefanka taleefankan ah 131 450 kuna weydiiso turjubaan afkaaka ah. Turjubaanka ayaa wacaya maamulaha oo khadkana ku jiraya si uu kaaga caawiyo hadalkaaga. Adeegan wax lacag ah lagaa qaadi mayo.

© May 2006  
NSW Department of Education and Training

GPO Box 33  
Sydney NSW 2001  
T 9561 8000  
www.det.nsw.edu.au  
NSW Public Schools - Leading the way  
Dugsiyada sare ee NSW – oo hogaamiyana



Ogow wax dheeraad ah 

Wixii macmuulaad dheeraad ah la hadal maamulaha dugsigaaga, la xirriir xafiiska gobolkaaga ama gal [www.schools.nsw.edu.au](http://www.schools.nsw.edu.au)

Wixii macluumaad turjuman ah gal [www.det.nsw.edu.au/languagesupport](http://www.det.nsw.edu.au/languagesupport)